



Tr: 23/0 4/2020

## War-Saxaafadeed

Maanta oo ay taariikhdu tahay 23 bisha Abriil 2020, waxaan shirkaan jaraa'id u qabanayaa in aan bulshada la wadaago furtinaaka Xoolaha Soomaaliya ee loo suuq geyn jiray dalka Boqortooyada Sacuudi Carabiya, kadib dadaal ay samaysay Wasaarada Xanaanada Xoolaha Dhirta & Daaqa Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyadoo wadashaqayn wanaagsan iyo taageero ka helaysaa Wasaaradda Deegaanka, Beeraha iyo Biyaha Boqortooyada Sacuudi Carabiya.

Waxaan halkaan ugu mahad celinayaa Boqortooyada Dalka Sacuudiga oo hormuudka u yahay Khaadimka labada Xaram ee Shariifka ah Malik Salman Bin Cabdul Casiis iyo Wasaaradda Deegaanka, Beeraha iyo Biyaha ee Sacuudiga Madaxdeedii oo runtii siniyadsami leh noola shaqaysay Mudadii lixda bilood ee howshani aan kawada shaqaynaynay ilaa ugu danbayntiina ay miro dhal noqotay. **Waana Markii ugu horaysay muddo lix sanadood kadib Xoolaha Soomaaliya loo furo Suuqyada Gudaha ee Boqortooyada Sacuudiga, iyadoo sanadaahasi waqtiga Xajka ah o keliyah naloo furi jiray, waana guul usoo hoyatay Shacabka Soomaaliyeed.**

Sidaan la wada socono Xoolaha waa laf dhabarta dhaqaalaha dalka, islamarkaana ay ku tiirsan yihiin qoysas badan oo Soomaaliyeed, haddaba Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxaa ay dadaalo farabadan ugashay sidii suuqaqii horey ujiray loo soo celin lahaa suuqaq cusub oo xoolaha loo iibgeeyo loo abuuri lahaa si loo daboolo baahida asaasiga ah ee xoolo-dhaqatadeena loona xoojiyo awoodda ganacsatada Soomaaliyeed.

Sidaa daraadeed; runtii waa arrin muhiimaddeeda u leh xoola dhaqatada iyo ganacsatada ka shaqeysata xoolaha iyo kuwa kaloo badan oo si toos iyo si dadbanba uga shaqeeya arrimaha xoolaha.

Ayadoo maanta uu ka jiro dunida hoos udhac dhaqaale oo ballaaran, culeys caalami ah oo ka yimid cudurka safmareenka ah ee COVID 19 awgeed, haddana waa Ilaah mabaddii in aan xoolo dhoofino taasoo dhaqaalaha Shacabka Soomaaliyeed kor usoo qaadaysa.

Waa arrin lagu farxo waxayna qayb weyn ka qaadansaa kor u qadist dhoofka Waxsoosaarka gudaha GDP.

Waxaan xooga saareynaa in aan joogteyno suuqaasi iyo suuqyada kale islamarkaana aan sii raadino suuqyo kale oo lagu iibiyo Xoolaha iyo Uunta Xoolaha.

## Dhamaad

